



## Ogeesiinta dhamaadka heshiskaaga kirada ku meel gaarka Notice to terminate your Introductory Tenancy

Gurigaaga

...kirada ku meel gaarka  
Maxaa dhici doona kadib?

**Waxaad jebisey heshiiskii kirada ku meel gaarka, waxaana laguu soo diray ogaysiin inuu dhammaaday.**

Haddii ay sidaas ku socoto waxaad luminaysaa gurigaaga Golaha Deegaanka. Haddii aad rabtid in dib loo eego go'aankaan, soo buuxi foomka codsiga dib u eegidda oo la socda qoraalkaan. Dibna ugu soo dir cinwaanka foomka ku qoran.

Waa inaan helnaa codsigaaga 14 beri dhexdooda laga bilaabo taariikhda ku qoran xag hoose ee ogaysiinta dhammaashada.

### **Dib u eegida**

Waan kuu soo qori doonaa ugu yaraan 5 beri ka hor dib u eegida oo aan kuu sheegayno meesha iyo waqtiga uu dhacayo. Waad imaan kartaa dib u eegida, waana ku soo raaci karaa qof kale haddii aad doonaysid.

Sarkaal sare baa dib u eegi doona arrinta. Sarkaalku waa inuusan lug ku lahayn go'aankii hore ee lagu joojiyey heshiiskaagi hore.

Dib u eegidu way arkaysaa macluumaad kasta aad noo keentid, waana xaqiijinaysaa inaan raacnay hab sax ah oo sharciga waafaqsan joojinta heshiskaaga.

Waxaan kuu soo diri doonaa go'aanka kama dambayska ah ee dib u eegida labo usbuuc dhexdood.

### **Qaadashada haysashada gurigaaga**

Haddii Dib u eegidu waafaqo go'aankii hore, waxaan waydiisanaynaa maxkamada ogolaansho in lagaa saaro guriga.

Maxkamadu waxay kuu shegi doontaa taariikhda ay tahay inaad uga baxdid guriga. Haddii aanad uga bixin waqtigaas, waxaan waydiisanaynaa maxkamada sharci fuliyaal kaa saara guriga.

### **Markii lagaa saaro kadib**

Magacaaga waxaa lagu dari karaa liiska dib u eegida guriyeynta oo micneheedu yahay inaan ku siin doonin guri golaha deegaanka oo kale mustaqbalka.

Taas micneheedu waa inaad noqonaysid guri la'aan. Tani waxba kama badalayso go'aankii lagaaga saaray guriga-kaasi wali waa soconayaa. Haddii aad ku dhacdid guri la'aan ama aad ku dhawdahay inaad noqootid guri la'aan; waxaad nagala soo xiriiri kartaa teleefoon 0161 953 2662 si lagu siiyo latalin siyaado ah.

Haddii aad doonaysid latalin madax-banaan, qaado warqadaan daabacan iyo ogaysiinta ijaar joojinta oo u geey xaafiiska latalinta muwaadinka, xarunta sharciga, xarunta ka caawinida guriga ama garyaqaan. Faahfaahin waxaa laga helayaa buuga telefoonada.

### **Sidee loola xiriirikaraa**

U dir teleefoon: 0161 953 2662

Faakis u dir: 0161 953 2660

Fariin qoran u dir: 0161 953 2526

Emayl u dir: [www.northwardshousing.co.uk](http://www.northwardshousing.co.uk)

### **Guriyaynya xaga Waqooyi**

Guryaha Koonsolka ah ee Waqooyiga Manjiistar

## **0161 953 2662**

8 subixii ilaa 5.30 galabtii Isniinta ilaa Jimcaha.

Faaksii 0161 953 2660

Teleefoonka fariinta qoran 0161 953 2526

Emayl [info@northwardshousing.co.uk](mailto:info@northwardshousing.co.uk)

Inteerneyt ka galid [www.northwardshousing.co.uk](http://www.northwardshousing.co.uk)

Shaqaalaha saaxiibnimo leh ee guriyeynta Xaga-Waqooyi waxay diyaar u yihiin inay kaa caawinaan:

- **Bixinta ijaarkaaga.**
- **dalbida dayactir.**